

# EOGOAC

## Educational Opportunity Gap Oversight and Accountability Committee

### Codkaaga hala maqlo!

Guddiga Indho indheynta iyo La xisaabtanka Farqiga Fursadda Waxbarashada (EOGOAC) iyo Guddiga Latalinta Waxbarashada Dareenka Bulshada (SEL) ayaa si wadajir ah u martigelin doona **madal qoys iyo mid bulsho maalinta khamiista, 4ta Nofeembar laga bilaabo 5ta galabnimo ilaa 7da fiidnimo** si looga doodo Waxbarashada Dareenka Bulshada.

Waxbarashada Dareenka Bulshada (SEL) waxaa si guud loo fahamsan yahay inay tahay geedi socod ay shaqsiyaadku ku dhisaan wacyiga iyo xirfadaha ku aadan maareynta shucuurta, dejinta yoolalka, sameynta xiriiro, iyo sameynta go'aano mas'uuliyadeed oo taageera guusha dugsiga iyo mida nololaha. Udub dhexaadka waxbarashadaas, SEL waxay ku saabsan tahay taageeridda badqabka shucuureed ee bulshada iyo hubinta in qof kasta oo dhallinyaro ah dareemo dareen qoto dheer oo ku aadan dugsigooda iyo bulshadooda. Waqtigaan adag ee gaarka ah, waxaa muhiim ah inaan isku nimaadno si aan u dhageysanno, waxna u barano oo aan si fiican u fahamno saamaynta sanadkii hore ku yeeshay caafimaadka bulshada iyo shucuurta carruurta ee aan caddaanka ahayn. Waxaan ku martiqaadeynaa ardayda, qoysaska iyo jaaliyadaha inay nala wadaagaan sida dugsiyadeena ay ula shaqeeyaan qoysaska iyo bulshooyinka aan caddaanka ahayn si loo abuuro fursado siman oo loogu talagalay waxbarashada bulshada iyo shucuurta (SEL).

Mawduucyada laga wada hadlay waxaa kamid ah:

- Ardayda dhigta
- SEL dhan ahaan ku habboon
- Wada naqshadeynta SEL ka qoysaska
- U diyaarinta baraha ee shaqada SEL

[Boosku wuu xadidnaan doonaa, markaas fadlan hore isku diiwaangeli.](#) Mudnaanta koowaad waxaa la siin doonaa ardayda, qoysaska iyo xubnaha bulshada. Turjumaada Isbaanishka iyo ASL ayaa la bixin doonaa. Haddii aad u baahan tahay habbaynta ama turjumaada luuqadda, fadlan ku sheeg diiwaangelintaada.

**Maxaa:** Madasha Qoyska iyo Bulshadda

**Kuma:** Qoysaska, ardayda, shaqaalaha dugsigu, qareenada, waxbarashadda, xubnaha bulshadda

**Goorma:** Khamiista, 4ta Nofeembar laga bilaabo 5pm-7pm

**Halkee:** Madasha oonleenka ah Zoom dhexdeeda

-

Fadlan u gudbi fariintaan qof kasta oo xiiseen lahaa!

Si aad u hesho macluumaadka dheeraadka ah ee ku saabsan EOGOAC, fadlan booqo [websaydkayaga](#).

## La xidhiidh Shaqaalaha

**Maria Flores** - Agaasimaha Fulinta, Xarunta Horumarinta Waxbarashadda Ardayga (CISL)

Iimaylka: [maria.flores@k12.wa.us](mailto:maria.flores@k12.wa.us)

**Heather Rees** - Khabiirka Cilmi baarista, Xarunta Horumarinta Waxbarashadda Ardayga (CISL)

Iimaylka: [heather.rees@k12.wa.us](mailto:heather.rees@k12.wa.us)

### Fursada Waxabrashada Gal daloolada Muuqaada iyo Guddida

**La xisaabtan** waxaa la sameeyay intii lagu jiray 2009 sharci dejinta si loo sii wado in wax laga qabto gol daloolada guul gaadhida gobolka Washington.

Guddida waxaa dhiirigelinaya [RCW 28A.300.136](#) si loo soo saaro natiijooyinka iyo talooyinka ka yimid shantii Guul gaadhideed 2008 ee Fursada Waxabrashada ee Gal daloolada waxbarashadda si loo hirgeliyo qorshaha oo loogula taliyo xeerarka iyo xeeladaha Kormeeraha Waxbarashadda Dad waynaha, Guddida Heerarka Macalinka Xirfad yaqaanka ah iyo Guddida Waxbarashadda Gobolka.

